

Xaqqaha iyo Ma'uuliyadaha Macaamiisha WIC

Waxaan helay macluumaad ku saabsan xaqqahayga iyo waajibaadkayga ka macmiilka WIC ahaan. Waxaan fahamsanahay inaan xaq u leeyayah:

- Inaan shaqaalaha WIC iyo bakhaarada cuntadaba ka helo macaamil cadaalad iyo ixtiraam leh.
- in macluumaadka aan shaqaalaha WIC siiyo uu ahaado mid qarsoon. Inaan loo gudbinayn qof ka baxsan Barnaamijka WIC ayada oo aan aniga fasax la iga haysan.
- Inaan helo macluumaad ku saabsan nafaqada iyo daryeelka caafimaadka iyo adeegyada kale ee waxtarka leh.
- Inaan adeegsan karo dukaan ama farmashi kasta oo ku yaala Gobolka New York (NYS) kaasoo ogol aqbalaadda WIC.
- Inaan helo cunto daboolaysa baahiyahayga nafaqada, ama kuwa cunugayga.
- Inaan dalban karo in la ii wareejiyo wakaalad kale oo maxali ah oo ay WIC leedahay.
- In si qoraal ah la iigu sheego xiliga iyo sababta ay dheefahayga Barnaamijka WIC u dhammaan doonaan.
- Inaan codsan karo dhegaysi cadaalad ah haddii aanan ku qancin go'aanka ku saabsan u qalmitaankayga.

Macluumaadka aan bixinayo si loo eego inaan u qalmo Barnaamijka WIC uu yahay mid sax ah, inta aan ka ogayah. Waxaan fahamsanahay in:

- Barnaamijka WIC ee Gobolka New York uu ogolaanayo in macluumaadkayga WIC lala wadaago barnaamij gaar ah oo qaabilan caafimaadka iyo waxbarashada sida Medicaid, Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dhammaystiran (Supplemental Nutrition Assistance Program, SNAP), Kaalmada Kumeelgaarka ah ee Qoysaska Danyarta ah (Temporary Assistance to Needy Families, TANF) iyo Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Caruurtta (Child Care Assistance Program). Macluumaadka noocas ah waxaa adeegsan doona hay'adaha WIC ee gobolka iyo kuwa maxaliga ah iyo ururada dowliga ah oo kaliya ayaga oo u adeegsanaya maamulista barnaamijyadooda u adeega dadka u qalma Barnaamijka WIC. Barnaamijyadaanu waxay macluumaadkaan u adeegsan karaan ujeedooyinka soo socda: si ay go'aan uga gaaraan u qalmitaankayga barnaamijyadooda; si ay ii siiyaan macluumaad ku saabsan barnaamijyadaas nidaamka codsiguna u sahlanado; si ay u wanaajiyaaan caafimaadkayga, waxbarashadayda, ama badqabkayga haddii aan ka qornahay barnaamijyadooda; iyo inay xaqijiyaan in baahiyahayga daryeelka caafimaadka la daboolo.
- Shaqaalaha Barnaamijka WIC waxay hubin karaan macluumaadka aan siiyay si ay u xaqijiyaan inuu saxan yahay. Waxay la xiriiri karaan maamulahayga ama ilaha kale ee dakhligayga. Waxay macluumaadkayga canshuurta ka heli karaan Waaxda Canshuuraha iyo Maaliyadda (Department of Taxation and Finance) ee Gobolka New York. Marka ay go'aaminayaan inaan ka mid noqon karo WIC iyo in kale, ima weydiin karaan macluumaadka wixii ka horeeyay 12 bilood kahor inta aanan codsan. Haddii ay rabaan inay ogaadaan in shuruucda WIC la jabiyyat iyo in kale, waxay I weydiin karaan macluumaadka muddadii aan qaadanayay dheefaha WIC.
- Waa inaan wakaaladda deegaankayga ku taala ee WIC u sheegaa haddii aan qorshaysto inaan guuro, lambarka teleefoonka badasho, dakhliga qof kamid ah qoyskaygu isbadalo, ama haddii aan doonayo inaan u badasho wakaalad kale oo WIC ah oo maxali ah.
- Haddii aanan sheegin runta ama haddii aan si kas ah u qariyo macluumaad si aan u helo dheefaha WIC, waxaa khasab igu noqonaysa inaan Gobolka u celiyo dheefaha aanan xaq u lahayn. Waxaa sidoo kale maxkamad I gayn kara Gobolka New York ama saraakiisha federaalka.
- Waxaan iska diiwaangalin karaa kaliya hal Barnaamij oo WIC ah. Waxaan xaqijinayaa inaan ka diiwaangashanayn Barnaamij kale oo ay WIC leedahay.
- Cuntooyinka WIC waxaa kaliya oo loogu tala galay xubinta qoyska. Ma iibin karo, ma iib gayn karo, mana bixin karo dheefaha WIC si kastaba ha noqotee.
- Haddii cuntayda loo baahdo in la badalo ama muddo gaaban la joojiyo, waxaan wacayaa wakaaladda WIC ee deegaankayga.
- Waa mas'uuliyad aniga isaaran inaan shaqaalaha iyo adeegyeasha WIC kula dhaqmo sharaf iyo xushmad. Waxana fahamsanahay in la iga saari karo ama aanan xaq u yeelan Karin Barnaamijka WIC haddii aan handado ama xadgudub jireed aan u gaysto adeegyeasha iyo shaqaalaha iibka ee WIC

Waxaan ogsoonahay in wakaaladda WIC ee deegaankaygu ay ii diyaarin doonto adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada nafaqada, iguna dhiirigalin doonto inaan ka qaybqaato adeegyadaan.

Waxaan fahamsanahay in shuruucda u qalmitaanka iyo ka qaybqaadashada Barnaamijka WIC ay qof walba u simanyihiiin, ayada oo aan loo eegayn qolada, midabka, waddanka uu kasoo jeedo, da'da, naafanimada, ama jinsiga.



Department
of Health

sii socda

Codsashada Dhagaysi Cadaalad ah

Haddii codsigaaga dheefaha lagaa diido ama dheefaha lagaa joojiyo, waxaad xaq u leedahay dhegaysi caddaaladeed. Dhgaysiga caddaaladda ah waa fursadda aad xaakimka ugu sheegi karto sababta aad u aaminsan tahay in go'aanku khaldanyahay. Waa inaad dhagaysiga kusoo codsataa 60 maalmood gudahood marka codsiga lagaa diido ama marka laguu sheego in dheefaha lagaa joojinayo. Haddii aadan kusoo codsan 60 kaas maalmood gudahooda, waxaad luminta doontaa fursadda dhegaysiga caddaaladeed.

Muddada aqoonsigu waa tirade wakhtiga aad qaadanayso dheefaha WIC. Haddii dheefahaaga lagu joojiyo ayada oo muddadii aqoonsiga dhexda looga jiro aadna dhegaysi caddaaladeed ku codsato 15 maalmood gudahood, dheefahaaga WIC waa ay sii soconayaan ilaa natijjada dhagaysiga maxkamadda laga ogaanayoama ilaa laga gaarayo dhammaadka muddada aqoonsiga, hadba kii soo hormara. Ka codso dhegaysiga wakaalada WIC ee deegaankaaga (shaqaalaha ayaa ku caawin doona) ama la xiriir Barnaamijka WIC ee NYS:

boostada: Wic Program Director NYSDOH, Riverview Center 150 Broadway, 6th Floor Albany, NY 12204	telefoonka: (518) 402-7093; fakiska: (518) 402-7348; ama limaylka: NYSWIC@HEALTH.NY.GOV
-----------------------------------------------------------------------------------------------------------	-----------------------------------------------------------------------------------------------

Tani waa bayaanka qiraalka ah ee aan ku saxiixay habka kombuyutarka kahor inta aanan helin dheefahayga WIC:

Waxaa la I baray xaquuqahayga iyo waajibaadkayga iga saran Barnaamijka WIC. Waxaan caddaynayaa in macluumaadka aan ka baxshay u qalmitaankaygu yahay mid dhammaystiran oo sax ah inta aan ka ogahay. Macluumaadkaan waxaan u baxshay si aan u helo dheefaha WIC waxaana fahamsanahay in saraakiisha wakaaladda WIC ee gobolka ama maxaliga ah ay hubin karaan macluumaadkaan haddii ay u baahdaan ayaga oo la xiriiraya dadka aan u shaqeeyo ama ilaha kale ee dakhligayga, iyo/ama ayaga oo helaya xogtayda canshuuraha ee Waaxda Canshuuraha iyo Maaliyadda ee Gobolka New York. Waxaan si gaar ah u ogolaanayaa in xogahayhga canshuuraha ee kujira Waaxda Canshuuraha iyo Maaliyadda ee Gobolka New York. loo gudbin karo ujeedadaan darteed, taasoo ay kujiri karaan macluumaad shaqaalaysii oo gaar ah oo Waaxda Canshuuraha iyo Maaliyadda ee Gobolka New York. ay siiyeen dadka aan u shaqeeyo si waafaqsan macluumaadka Warbixinta Shaqaalaysiinta Cusub iyo Mushaarka (New Hire and Wage Reporting). Waxaan sidoo kale fahamsanahay in been abuurka ula kaca ah uu ii horseedi karo maxkamadahn madani ah ama fal danbiyeed ah si waafaqsan sharciga gobolka iyo/ama kan federaalka. Been abuurka kaska ah waxaa kamid ah, wallow aysan ku koobnayn, been sheegis ulakac ah, qarinta ama in Meesha laga saaro dakhliga qoyska, tirade qoyska, xogta caafimaadka, xaalada Medicaid ka iyo goobta degenaansha. Waxaan sidoo kale fahamsanahay in warbixin been ama marin habaabin ah ama ka beenshegis ah, qarinta ama Meesha ka saarista xaqiijo jirta ay ka dhalan karto in barnaamijka la iga saaro la iguna khabo inaan dib u bixiyo qiimaha lacagta dheefaha WIC ee aan sidakhaldan ku helay ayada oo aan lo eegayn inaan ula dan lahaa inaan si khaldan ku helo iyo in kale. Ugu danbayn, waxaan fahamsanahay inaan iska diiwaangalin karo hal Barnaamij oo WIC ah. Waxaan halkaan ku xaqiijinayaa in aanan hadda ka diiwaangashanayn Barnaamij kale oo ay WIC leedahay. Waxaan codsanyaa in dheefaha maantaba la ii bilaabo.

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salsan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), naafonimada, da'da, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqlaka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay kala xidhiidhaan Hay'adda Gobalka ama deegaanka ee mas'uulka ka ah maamulka barnaamijka ama xarunta TARGET ee USDA lambarka (202) 720-2600 (cod iyo TTY) ama waa inay la xidhiidhaan USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay , iyada oo la wacayo (866) 632-9992, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eeddeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la soo eeddeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in loogu diraa USDA;

(1) boostada: U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410; ama

(2) fakiska: (833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama
(3) iimaylka: program.intake@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.

Waxyaabaha ku saabsan cabashooyinka kale ama si aad u codsato xiriir Dhagaysi oo Cadaaladeed la xiriir:

(1) boostada: WIC Program Director
NYSDOH, Riverview Center
150 Broadway, 6th Floor
Albany, NY 12204; ama
(2) telefoonka: (518) 402-7093; fakiska (518) 402-7348; ama
(3) iimaylka: NYSWIC@HEALTH.NY.GOV